

Mustaqbalka daryeelka caafimaadku wuxuu ku jiraa gacmaha dadka reer Alberta

Janaayo 16, 2024

Dowladda Alberta waxay bilaabeysaa kulamo xiriir ah oo shaqsi ah gaarna ah oo gobolka dhan ah oo lala yeesho shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo dadka reer Alberta si ay gacan uga geystaan qaabeynta mustaqbalka daryeelka caafimaadka.

Iyada oo qayb ka ah dadaalka joogtada ah ee dawladda ee dib u eegista nidaamka daryeelka caafimaadka, dadka reer Alberta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay iska diiwaangeliyaan mid ka mid ah fadhiyada ka qaybgalka shakhsiga ah ee soo socda, kaasoo bilaabmaya Janaayo 23. Kulamadani waa fursad wadahal furan oo ku saabsan caqabadaha, xalalka iyo hal-abuurro ka caawin doona dhisidda nidaam daryeel caafimaad oo xooggan.

La shaqaynta shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee safka hore, la-hawlgalayaasha gobolka iyo dadka reer Alberta ayaa muhiim u ah abuurista nidaam caafimaad oo si wanaagsan u taageera shaqaalaha oo wanaajiya daryeelka bukaanka. Fikradda, khibradaha iyo jawaab celinta laga helayo dadka reer Alberta waxay gacan ka geysan doontaa abuurista nidaam daryeel caafimaad oo waxtar u leh dadka reer Alberta goorta iyo meesha ay u baahan yihiin.

"In la hubiyo in dadka Alberta iyo qoysaskoodu ay leeyihiin nidaam daryeel caafimaad oo jawaab celin leh oo la isku halayn karo waa muhiim. Taasi waa sababta ay aad muhiim ugu tahay inaan wada hadal fool ka fool ah la yeelano shaqaalaha safka hore, bukaanada iyo daryeelayaasha ku saabsan caqabadaha jira iyo sida aan u dhisi karno nidaam daryeel caafimaad oo xoog leh oo u adeega baahida hadda iyo mustaqbalka dadka reer Alberta."

Adriana LaGrange, Wasiirka Caafimaadka

Xubnaha dawladda Alberta waxay ka qaybgeli doonaan fadhiyadan meel kasta oo suurtagal ah, oo ay ku jiraan Wasiirka Caafimaadka Adriana LaGrange, Wasiirka Waayeelka, Adeegyada Bulshada Jason Nixon, Wasiirka Caafimaadka Maskaxda iyo Qabatinka Dan Williams, iyo Xoghayaha Baarlamaanka ee Caafimaadka Miyiga Martin Long.

"Sida aan u dhiseyno nidaam diiradda saaraya soo kabashada, ka qaybgalka joogtada ah wuxuu xaqiijin doonaa daryeelka ugu wanaagsan ee kuwa wajahaya caqabadaha caafimaadka dhimirka

ama la ildaran cudurka dilaaga ah ee qabatinka. Dawladdeenu waxay sii wadi doontaa inay la shuraakoobaan kuwa gaarsiinaya adeegyada dadka u baahan.”

Dan Williams, Wasiirka Caafimaadka Maskaxda iyo Qabtiinka

"Kulamadan ka qaybgalka shakhsi ahaaneed waxay fursad muhiim ah u yihiin dadka reer Alberta si ay u bixiyaan jawaab celintooda iyo khibradahooda gacanta koowaad ee nidaamka daryeelka caafimaadka. Marka aan qaabeyno mustaqbalka caafimaadkeena, caafimaadka dhimirka iyo hababka daryeelka joogtada ah, fadhiyadaani waa kuwo muhiim ah, waxaan ku dhiirigelinayaa qof walba inuu ka qaybqaato."

Jason Nixon, Wasiirka Waayeelka, Bulshada iyo Adeega Bulshada

Shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo xubnaha dadweynaha waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay iska diiwaan galiyaan khadka tooska ah (online) si ay u yeeshaan kulan qof ahaaneed oo aagooda ah. Qorshayaasha ka-qaybgalka dheeraadka ah ayaa lagu dhawaaqi doonaa toddobaadyada soo socda. Marka lagu daro fadhiyada dadweynaha, waxaa jiri doona ka-qaybgal gaar ah oo lala yeesho hoggaamiyeyaasha asaliga ah iyo la-hawlgalayaasha kale ee daryeelka caafimaadka. Macluumaadka sida joogtada ah loo cusboonaysiiyay ee ku saabsan fadhiyada hawlgelinta ee cusub iyo kuwa socda ayaa laga heli karaa bogga internetka ee dawladda ee "Qaabka habka". Wasiir LaGrange waxa kale oo uu booqan doonaa cisbitaalada iyo xarumaha daryeelka degdega ah ee gobolka oo dhan inta hawshan lagu jiro oo uu sii socon doono guga. Waxay maqli doontaa gacanteeda koowaad shaqaalaha rugaha caafimaadka iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee safka hore iyadoo ka shaqaynaysa sidii ay u aqoonsan lahayd siyaabaha lagu sameeyo horumarinta muddada-gaaban iyo tan fog ee bixinta daryeelka caafimaadka ee gobolka.

Xaqiiqooyinka degdega ah

Caafimaadka Alberta waxa ay qorshaynaysaa in ka badan 40 kulan oo ka qayb gal ah oo bilaabmaya Jan. 23 oo soconaysa ilaa Abriil 2024. Liis dhamaystiran oo ah goobaha iyo jadwalka ayaa laga heli karaa khadka tooska ah (online)

- Lix hoolal oo casri ah ayaa la qabtay ilaa hadda, oo ay ka soo qayb galeen ilaa 10,000 ka qeybgake.
- In ka badan 16,000 oo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ah iyo dadka Alberta ayaa bixiyay jawaab celin iyada oo loo marayo agabka ka-qaybgalka khadka ilaa maanta.

Xogaha la xiriira

- Dib ugu kuurogalidda daryeelka caafimaadka Alberta ([Refocusing health care in Alberta](#))



War saxaadafeed

- Dib ugu kuurogalidda - Qaabaynta Jidka adeegsiga ([Shape the Way - Refocusing Tab](#))

Wararka laxiriira

- Qaabee mustaqbalka daryeelkaaga caafimaad ([Shape the future of your health care](#)) (Deseember.12, 2023)
- U yeerida dhammaan dadka Alberta si ay gacan uga geystaan qaabeynta daryeelka caafimaadka ([Calling on all Albertans to help shape health care](#)) (Nofeember. 21,2023)